**Sharciga 1da Agoosto 1960, lamba. 1.**

**Wakiilasho Xag Bixin Cafis.**

**MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA AH EE JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay oggolaanshaha (ansixinta) Golaha Xeerdejinta;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Shaciga soo socda:

**Qod. 1**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa loo wakiishay in uu bixiyocafis guud, ee la xiriira dembiyada siyaasadee, kuwa caadiga ah, miltariga, iyo maaliyadeed (lacagta) oo la galay ka hor 2da Luulyo 1960.

**Qod. 2**

Cafiska ku xusan qodobka hore waxa laga dabbaqayaa dhammaan Dhulka Jamhuuriyadda Sooaamliya.

**Qod. 3**

Sharcigan waxaa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah.

Sharigan waxaa la gelnayaa Ururinta Rasmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinyaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta waxa uu ku khasban yahay in uu dhowro, loona dhowro sharci ay Soomaaliya ahaan.

Taariikhda Muqdisho, maanta oo ah 1da Agoosto 1960.

Madaxweynaha ku Meel Gaarka

**Adan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Arr, Diinta iyo Caddaaladda

**Maxamuud Axmed Caddaan**